



# Waxyeelada Galmada

Australiya gudaheeda, sharciga ayey ka soo horjeedaa inaad galmo ahaan qof waxyeelayso.

Qofka sameeya waxyeelo galmo wuxuu geli karaa xabsi, kii uu yahayba nin ama naag.

Haddii adiga ama qof aad taqaan uu khatar ku jiro ka wac boliiska **000**.  
Boliiska Australiya waa ammaan waana lagu kalsoonaan karaa.

Wixii ah macluumaad iyo la talin qarsoon oo bilaash ah ka wac 1800 RESPECT **1800 737 732**.

Haddii aad u baahan tahay turjumaan bilaash ah wac **131 450**.

Dawlada Australiya (Australian Government) uma dulqaadato waxyeelada galmada xaalad walba ha ahaatee

Waxyeelada galmada waxay ku wajahan tahay qof kale oo aan raali ka ahayn.

Waxyeelada galmada waxaa ka mid noqon kara:

- ku khasbida qof in loo galmoodo ama uu sameeyo ficil galmo;
- ku khasbida qof inuu daawado sawirada jinsiga galmada; ama
- u galmoonshaha ama fal galmo ku sameynta ilmo.

Waxyeelada galmo ee lamaanahaaga, xaaskaaga ama xubin qoyska ka mid ah sidoo kale waxay ka soo horjeedaa sharciga.

## Dumarku waxay leeyihiin xuquuq la mid ah ragga.

Shuruucda Australiya waxay ula dhaqmaan dumarka iyo ragga si siman.

Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu u noolaado si xor ka ah qalalaasaha, ee xiriirka farxada leh iyo bulshadaba.

Dumarku inay aqbalaan ma aha in loola dhaqmo si xun ama la waxyeeleeyo.

## Waxaa jira adeegyo dhaqan ahaan xasaasi ah Australiya gudaheeda oo ku caawin kara.

**1800 RESPECT** waa adeega La talinta Qalalaasaha Qoyska iy Qoyska Waxyeelada Galmada Qaranka ee Australia ( Australia's National Sexual Assault, Family and Domestic Violence Counselling service). Waxay bixisaa macluumaad iyo la talin interneetka ah iyo taleefanka oo qarsoon bilaashna ah. La taliyayaasha way ku dhageysan doonaan, su' aalaha ayey ka jawaabi doonaan waxayna kuu gudbin karaan adeegyada kale ee taageerada ee xaafadaada.

Ka wac **1800 737 732** ama gal website ka 1800 RESPECT ah **www.1800RESPECT.org.au**.

## Ma u baahan tahay turjumaan?

Ka wac Adeega Turjumaada qoraalka iyo Afka (**Translating and Interpreting Service (TIS)**) bilaash ahaan **131 450**. TIS ayaa kaa caawin karta si aad ula hadasho adeegyada kale. TIS ma bixiso la tallin.